# Suurat An-Naml

# سورة النمل

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Xarafka hore Isagoo kale waan soo Maray) Inuu ku Tusin Mucjisada Quraanka, Taasi Waa Aayaadka Quraanka iyo Kitaabka Cad.

طسٓۚ تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡقُرۡءَانِ وَكِتَابٖ مُّبِينٍ ١

2. Waana Hanuunka iyo Bishaarada Mu‘miniinta.

هُدٗى وَبُشۡرَىٰ لِلۡمُؤۡمِنِينَ ٢

3. Ee ah kuwa Ooga Salaadda oo Guta Zakada oo Aakhiro Yaqiinin.

ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤۡتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَهُم
بِٱلۡأٓخِرَةِ هُمۡ يُوقِنُونَ ٣

4. Kuwaanse Rumayn Aakhiro waxaan u Qurxinay Camalkooda waana ku Indho la‘Yihiin (Wareersanyihiin).

إِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يُؤۡمِنُونَ بِٱلۡأٓخِرَةِ زَيَّنَّا لَهُمۡ
أَعۡمَٰلَهُمۡ فَهُمۡ يَعۡمَهُونَ ٤

5. Kuwaasi waa Kuwuu u Sugnaaday Cadaab Xun Aakharana Iyaga unbaa Khasaaray.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَهُمۡ سُوٓءُ ٱلۡعَذَابِ
وَهُمۡ فِي ٱلۡأٓخِرَةِ هُمُ ٱلۡأَخۡسَرُونَ ٥

6. Adiguna Nabiyow waxaad kala Kulmi Quraanka Ilaaha Falka San ee Og Agtiisa.

وَإِنَّكَ لَتُلَقَّى ٱلۡقُرۡءَانَ مِن لَّدُنۡ حَكِيمٍ عَلِيمٍ ٦

Suuraddu waxay ka warrami in Quraanka Kariimka ah Hanuun iyo Bishaaro u Yahay Mu‘miniinta Xaqa Rumaysan ee Salaadda si Fiican u Guta, Zakadana Bixiya, Aakharana Yaqiinsan, kuwaanse Rumaynin Aakharo waxaa loo Qurxiyey Camalkooda Xun Oyna ku Dhex Wareersanyihiin, waana kuwa Cadaab Xun u Sugnaaday oo Khasaaray Aakharo Illeen weybeeniyeene. Dhabtuna waa in Quraanku ka soo Degay Ilaaha Xakiimka ah ee wax walba Og Xaggiisa’Warkiisuna waa Run Cad. Xukunkiisuna waa Caddaalad Dhammaystiran. Waxaase loo Baahanyahay Rumayn, ku Dhaqan, ugu Yeedhid iyo Dhawrid. An-Naml (1-6).

---

7. Xusuuso Markuu ku Yidhi Nabi Muuse Ehelkiisa Anugu waxaan Arkaa Iftiin waxaan Idiinka Keeni Xaggiisa War Ama Waxaan Idiinka Keeni Dhuxul Daba inaad Kulaashaan.

إِذۡ قَالَ مُوسَىٰ لِأَهۡلِهِۦٓ إِنِّيٓ ءَانَسۡتُ نَارٗا سَـَٔاتِيكُم مِّنۡهَا بِخَبَرٍ
أَوۡ ءَاتِيكُم بِشِهَابٖ قَبَسٖ لَّعَلَّكُمۡ تَصۡطَلُونَ ٧

8. Markuu Yimid waxaa Loogu Dhawaaqay Waa la Barakeeyey Cidda

فَلَمَّا جَآءَهَا نُودِيَ أَنۢ بُورِكَ مَن فِي ٱلنَّارِ وَمَنۡ حَوۡلَهَا

Dabka la Joogta iyo kuwa Gaararkiisa ah, waxaana Nasahan Ilaaha Caalamka.

وَسُبْحَٰنَ ٱللَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٨﴾

9. Muusow Anugu waxaan ahay Ilaaha Adkaada ee Falka San.

يَٰمُوسَىٰٓ إِنَّهُۥٓ أَنَا ٱللَّهُ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٩﴾

10. Ee Tuur Ushaada, Markuu Arkay Iyadoo Gilgilan Sida Maska wuu Jeedsaday Isagoo Carari, Mana soo Noqon, Muusow ha Cabsanin, kuma Cabsadaan Agtayda Rasuulladuye.

وَأَلْقِ عَصَاكَ فَلَمَّا رَءَاهَا تَهْتَزُّ كَأَنَّهَا جَآنٌّ وَلَّىٰ مُدْبِرًا وَلَمْ يُعَقِّبْ يَٰمُوسَىٰ لَا تَخَفْ إِنِّى لَا يَخَافُ لَدَىَّ ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿١٠﴾

11. Ciddiise Dulmi Fasha markaas Wanaag ku Baddasha Xumaan ka Dib Anugu waxaan ahay Dambi Dhaafe Naxariista.

إِلَّا مَن ظَلَمَ ثُمَّ بَدَّلَ حُسْنًۢا بَعْدَ سُوٓءٍ فَإِنِّى غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١١﴾

Qisada Nabi Muuse iyo sida Ilaaheen ula Hadlay Meelo Badan yaa lagu sheegay, waxayna ku Tusin in Ilaahay Cidduu Doono oo Rasuuladiisii ka mid ahaa la Hadli Jiray, Tan kale waxay ku Tusin in Nabiyada Ceeb ku ahayn Cabsida Caadiga ah, wax Sharaftooda wax u Dhimana ayna ahayn. Tan kale waxay ku Tusin Awoodda Eebe iyo inuu wuxuu Doono Fali Karo.
Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Ilaahay Ma Seexdo kumana Habboona (Waa ka Dheeryahay) inuu Seexdo, Wuxuu Hoos u Dhigaa ama Koryeelo (Qaybta) waxaa u Kor Noqda Xaggiisa Camalka Habeenka Maalinta ka hor, iyo kan Maalinta Habeenka ka Hor. Waxaa wariyey (Ibnu Abii Xaatim). An-Naml (7-11).

---

12. Gali Gacantaada Jeebkaaga waxay soo Bixi Iyadoo Cad Xumaan La‘aan (Waxayna ka mid yihiin) Sagaal Calaamo oo Fircoon iyo Qoomkiisa loo Muujiyey, waxayna ahaayeen Qoom Faasiqiina.

وَأَدْخِلْ يَدَكَ فِى جَيْبِكَ تَخْرُجْ بَيْضَآءَ مِنْ غَيْرِ سُوٓءٍ فِى تِسْعِ ءَايَٰتٍ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَقَوْمِهِۦٓ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمًا فَٰسِقِينَ ﴿١٢﴾

13. Markay u Timid Calaamaddannadii Iyadoo Cad waxay Dheheen Kani waa Sixir Cad.

فَلَمَّا جَآءَتْهُمْ ءَايَٰتُنَا مُبْصِرَةً قَالُوا۟ هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١٣﴾

14. Wayna Diideen Iyagooy Yaqiinsatay Naftoodu Dulmi iyo Isla Sarreeyn Darteed, ee Day Siday ahaatay Cidhibtii Mufsidiinta (Xumo Wadayaasha).

وَجَحَدُوا۟ بِهَا وَٱسْتَيْقَنَتْهَآ أَنفُسُهُمْ ظُلْمًا وَعُلُوًّا فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿١٤﴾

Mucjisooyinka iyo Calaamadaha la Siiyey Nabi Muuse waxay ahaayeen Sagaal Oy ka Mid ahaayeen Usha iyo Gacantu Siday Suurad kale Sheegtay. si Fircoon iyo Qoomkiisa Falka Xumaa loogu wax Tuso, wayse Beeniyeen Xaqii Iyagoo Hoosta ka Og Runta, si ay Madaxnimada iyo Isla Waynida ugu Mitidaan, maxaase ka Dambeeyey oon Halaag iyo Khasaare ahayn, wax badanna waxaa la soo Sheegay in Dad Badan ay Diideen Xaqa iyagoo Garan Ilaalin iyo Dhawrid Maslaxo Gaara, Taasoo ah Madaxtinimo, Xoolo, iyo Isla Wayni Micno Darro. Ciddii Caqli lehna waa Xaal ay Waajibtahay inuu ku Waano Qaato. An-Naml (12-14).

15. Waxaan siinay Daawuud iyo Sulaymaan Cilmi, waxayna Dheeheen Mahad Ilaahbaa iska leh ee ah kan Naga Fadilay wax badan oo Addoomadiisa Mu‘miniinta ah.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ وَسُلَيْمَٰنَ عِلْمًا ۖ وَقَالَا ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ
ٱلَّذِى فَضَّلَنَا عَلَىٰ كَثِيرٍ مِّنْ عِبَادِهِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٥﴾

16. Wuxuuna Dhaxlay Sulaymaan Daawuud, wuxuuna yidhi Dadow waxaa nala Baray Codka Shimbiraha, waxaana nala siiyey wax kasta (oo Xukun ah) kaasina waa Fadliga Cad.

وَوَرِثَ سُلَيْمَٰنُ دَاوُۥدَ ۖ وَقَالَ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ عُلِّمْنَا
مَنطِقَ ٱلطَّيْرِ وَأُوتِينَا مِن كُلِّ شَىْءٍ ۖ
إِنَّ هَٰذَا لَهُوَ ٱلْفَضْلُ ٱلْمُبِينُ ﴿١٦﴾

17. Waxaa Loo kulmiyey Sulaymaan Junuudiisii oo Jinni, Insi iyo Shimbiro leh, iyagoo iscelcelin.

وَحُشِرَ لِسُلَيْمَٰنَ جُنُودُهُۥ مِنَ ٱلْجِنِّ وَٱلْإِنسِ
وَٱلطَّيْرِ فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿١٧﴾

18. Markay Yimaaddeen Togii Qudhaanjadana oy tidhi Qudhaanjo Qudhaanjooy Gala Guryihiinna Yeyna idin Jajabin Sulaymaan iyo Junuudiisu Iyagoo idin Ogayn.

حَتَّىٰٓ إِذَآ أَتَوْا۟ عَلَىٰ وَادِ ٱلنَّمْلِ قَالَتْ نَمْلَةٌ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّمْلُ
ٱدْخُلُوا۟ مَسَٰكِنَكُمْ لَا يَحْطِمَنَّكُمْ
سُلَيْمَٰنُ وَجُنُودُهُۥ وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١٨﴾

19. Markaasuu Muusooday Isagoo ku Qosli Hadalkeeda wuxuuna yidhi Eebow I waafaji inaan ku Mahdiyo Nicmadaad ugu Nicmaysay Ani iyo Waalidkay iyo Inaan Falo Wanaag Aad ka Raali tahay ina Gali Naxariistaada Addoomadaada Suuban Dhexdooda.

فَتَبَسَّمَ ضَاحِكًا مِّن قَوْلِهَا وَقَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِىٓ
أَنْ أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ ٱلَّتِىٓ أَنْعَمْتَ عَلَىَّ وَعَلَىٰ وَٰلِدَىَّ
وَأَنْ أَعْمَلَ صَٰلِحًا تَرْضَىٰهُ وَأَدْخِلْنِى بِرَحْمَتِكَ
فِى عِبَادِكَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١٩﴾

**Wuxuu Eebbe Sheegi wuxuu ugu Nicmeeyey Nabi Daawuud iyo Wiilkiisii Nabi Sulaymaan oo Nicmooyin ah Adduun iyo Aakhiroba, iyo in Nabi Sulaymaan loo Sakhiray Jinni, Insi iyo Shimbirahaba, Barayna Hadalka Shimbiraha intuu ka Kaso Afkooda, Sidoo kale Codka Qudhaanjadii Uga digtay Saaxiibadeed Jajabinta Nabi Sulaymaan iyo Colkiisoon Ogayn.**
**uuna Qoslay kuna Mahdiyey Eebbe, Warsadayna Wanaag isaga iyo Waalidiintiis, wanakaas wanaaggu in marka Eebe khayr ku siiyo Mahadiyo, wanaagna la falo, Xumaanta iyo Kibirkana layska Jiro oo laga Fogaado. An-Naml (15-19).**

---

20. Wuxuu Fiirfiiriyey Shimbirihii (Sulaymaan) Wuxuuna Yidhi Maxaan la Arki La‘ahay Hud-Hudkii Mise kuwa Maqan buu ka Midyahay.

وَتَفَقَّدَ ٱلطَّيْرَ فَقَالَ مَا لِىَ لَآ أَرَى ٱلْهُدْهُدَ
أَمْ كَانَ مِنَ ٱلْغَآئِبِينَ ﴿٢٠﴾

21. Waxaan Cadaabi Cadaab Daran ama waan Gawrici ama wuxuu iikeeni Xujo Cad.

لَأُعَذِّبَنَّهُۥ عَذَابًا شَدِيدًا أَوْ لَأَا۟ذْبَحَنَّهُۥٓ
أَوْ لَيَأْتِيَنِّى بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٢١﴾

22. Markaasuu Muddo Yar Maqnaa Markaasu Yidhi (Markuu Yimid) wa-

فَمَكَثَ غَيْرَ بَعِيدٍ فَقَالَ أَحَطتُ بِمَا لَمْ تُحِطْ بِهِۦ

وَجِئْتُكَ مِن سَبَإٍ بِنَبَإٍ يَقِينٍ ٢٢

xaan Ogaaday waxaadan Ogaanin, waxaana kaaga keenay ReeSaba War Yaqiina.

إِنِّي وَجَدتُّ ٱمْرَأَةً تَمْلِكُهُمْ وَأُوتِيَتْ
مِن كُلِّ شَيْءٍ وَلَهَا عَرْشٌ عَظِيمٌ ٢٣

23. Waxaan Helay Haweeney Xukumaysa lana Siiyey wax kasta (oo Xukun ah) waxayna Leedahay Carshi Wayn.

وَجَدتُّهَا وَقَوْمَهَا يَسْجُدُونَ لِلشَّمْسِ مِن دُونِ ٱللَّهِ
وَزَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَعْمَٰلَهُمْ فَصَدَّهُمْ عَنِ ٱلسَّبِيلِ
فَهُمْ لَا يَهْتَدُونَ ٢٤

24. Waxaan Helay Iyada iyo Qoomkeedii oo u Sujuudi Qorraxda Eebe ka Sokow wuxuuna U qurxiyey Shaydaan Camalkooda wuxuuna ka Leexiyey Jidka Mana Hanuunsana.

أَلَّا يَسْجُدُوا۟ لِلَّهِ ٱلَّذِى يُخْرِجُ ٱلْخَبْءَ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلْأَرْضِ وَيَعْلَمُ مَا تُخْفُونَ وَمَا تُعْلِنُونَ ٢٥

25. May u Sujuudaan Ilaaha soo Bixiya waxa ku Qarsoon Samooyinka iyo Dhulka oo Og waxaad Qarinaysaan iyo waxaad Muujinaysaan.

ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ۩ ٢٦

26. Ilaahay Isaga Mooye Ilaah kale ma jiro, waana Eebaha Carshiga Wayn.

Awoodda Eebaa iska leh, ha siiyo Nabi Sulaymaan Xukun Laakiin waxaa ka Qarsoomi kara wax Xayawaan Yari Ogaan karo sida Hud-Hudka'kaasoo uga warramay Ree Saba iyo Xukunkooda iyo waxay Caabudaan, Taasina La Yaab malaha mar Hadday wax walba ku Xidhanyihiin Awoodda Eebaha wax walba Koobay, ee Isaga uun Ilaah ah, ee Carshiga wayn Leh, Shaydaanbaase Dad Dhumiyey oo u Harag Lulay oo Xumaanta u Qurxiyey, waana Colka Dadka oon Marna ka Nasanayn Dhumintooda. Tan kale waxay ku Tusin Wanaagga Makhluuqa Qaarkiis sida Hud-Hudkaas Eebe iyo Cibaadadiisa u Yeedhay, Saas Darteed Yuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa he yeelee) u Reebay Dilidda Qudhaanjada, Shimbiraha, Hud-Hudka iyo Suradka.
Waxaa Wariyey (Imaam Axmed). An-Naml (20-26).

---

۞ قَالَ سَنَنظُرُ أَصَدَقْتَ أَمْ كُنتَ مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ٢٧

27. Wuxuuna Yidhi Waannu Eegi inaad Run Sheegi iyo inaad ka mid Tahay Beenaalayaasha.

ٱذْهَب بِّكِتَٰبِى هَٰذَا فَأَلْقِهْ إِلَيْهِمْ ثُمَّ تَوَلَّ عَنْهُمْ
فَٱنظُرْ مَاذَا يَرْجِعُونَ ٢٨

28. La Tag Warqaddaaydan kuna Tuur Xaggooda kana Durug Xaggooda, markaas Fiiri waxay soo Celiyaan.

قَالَتْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَؤُا۟ إِنِّىٓ أُلْقِىَ إِلَىَّ كِتَٰبٌ كَرِيمٌ ٢٩

29. Waxayna Tidhi Madaxeey waxaa La ii soo tuuray Warqad Sharaf leh.

إِنَّهُۥ مِن سُلَيْمَٰنَ وَإِنَّهُۥ بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ ٣٠

30. (Kuna Qoran) Waxay ka Timid Sulaymaan waxayna ku Billaabatay Magaca Eebaha Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

أَلَّا تَعْلُوا۟ عَلَىَّ وَأْتُونِى مُسْلِمِينَ ٣١

31. Ee Hayska Kay waynaynina iina Imaadda Idinkoo Muslimiina.

32. Waxayna Tidhi Madaxeey ii Ishaara Amarkayga ma Ihi Mid Goysa Amar Intaad ka Joogtaan.

قَالَتْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَؤُا۟ أَفْتُونِى فِىٓ أَمْرِى
مَا كُنتُ قَاطِعَةً أَمْرًا حَتَّىٰ تَشْهَدُونِ ﴿٣٢﴾

33. Waxayna Dhaheen Annagu waxaan Nahay kuwo Xoog badan oo Geesinimo Badan, amarkase adaa leh ee Fiiri Waxaad Fari.

قَالُوا۟ نَحْنُ أُو۟لُوا۟ قُوَّةٍ وَأُو۟لُوا۟ بَأْسٍ شَدِيدٍ وَٱلْأَمْرُ إِلَيْكِ
فَٱنظُرِى مَاذَا تَأْمُرِينَ ﴿٣٣﴾

34. Waxay Tidhi Xaakimyadu Hadday Magaalo ku Galaan (Xoog) way Fasaadiyaan waxayna ka yeelaan Ehelkeeda Sharafta leh kuwo Dullaysan Saasayna Falaan.

قَالَتْ إِنَّ ٱلْمُلُوكَ إِذَا دَخَلُوا۟ قَرْيَةً أَفْسَدُوهَا
وَجَعَلُوٓا۟ أَعِزَّةَ أَهْلِهَآ أَذِلَّةً ۖ وَكَذَٰلِكَ يَفْعَلُونَ ﴿٣٤﴾

35. Waxaanse u Diri Hadyad waxaana Eegi waxay La soo Noqdaan kuwa la Diray.

وَإِنِّى مُرْسِلَةٌ إِلَيْهِم بِهَدِيَّةٍ
فَنَاظِرَةٌۢ بِمَ يَرْجِعُ ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿٣٥﴾

**Markay u Tagtay Warqadduu waday Hud-Hud oo Faraysay Islaanimo, yey la Tashatay Haweenaydii Madaxdeedii, markayse Ismuujiyeen inay Xoog Leeyihiin yey iyadu u Soo jeedisay Dagaal la‘aan inay Hadyad u Dirto Eegtana Jawaabta'waxayna ahayd Haweenay Caqli Badan oo Waayo Arag ah.**
**Qataade Wuxuu Yidhi: Yaa ka Caqli Badan Islaanimadeedii iyo Gaalimadeediiba. Maxayse tari Isla wayni iyo Kibir iyo Dagaal Jacayl, waxba, waxaase Fiican Kaadsiinyo, Xaq raacid iyo Islaanimo iyo in Xaqa loo Yeedho Had iyo Jeer. An-Naml (27-35).**

---

36. Markay soo Gaadhay Hadyaddii (Nabi) Sulaymaan Yuu Yidhi ma waxaad ii Kordhinaysaa Xoolo, wuxuu I siiyey Eebe yaa ka khayr Roon wuxuu idin siiyey, Idinkaase ku Farxi Hadyadiinna.

فَلَمَّا جَآءَ سُلَيْمَٰنَ قَالَ أَتُمِدُّونَنِ بِمَالٍ فَمَآ ءَاتَىٰنِۦَ ٱللَّهُ
خَيْرٌ مِّمَّآ ءَاتَىٰكُم بَلْ أَنتُم بِهَدِيَّتِكُمْ تَفْرَحُونَ ﴿٣٦﴾

37. Ee U celi Waxaana ula Imaanaynaa Junuud (Col) ayna Awoodayn waxaana ka Bixinaynaa Magaalada Iyagoo Dullaysan oo Ihaanaysan.

ٱرْجِعْ إِلَيْهِمْ فَلَنَأْتِيَنَّهُم بِجُنُودٍ لَّا قِبَلَ لَهُم بِهَا
وَلَنُخْرِجَنَّهُم مِّنْهَآ أَذِلَّةً وَهُمْ صَٰغِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Wuxuuna Yidhi Qoomow Yaa ii Keena Carshigeeda (Kursigeeda) ka hor Imaatinkooda Iyagoo Muslim ah.

قَالَ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَؤُا۟ أَيُّكُمْ يَأْتِينِى بِعَرْشِهَا
قَبْلَ أَن يَأْتُونِى مُسْلِمِينَ ﴿٣٨﴾

39. Wuxuuna yidhi Mid Xoog badan oo Jin ah anaa kuu Keeni Intaadan ka Kicin Fadhigaada, waxaana ahay Xoog badane Aamina.

قَالَ عِفْرِيتٌ مِّنَ ٱلْجِنِّ أَنَا۠ ءَاتِيكَ بِهِۦ قَبْلَ أَن تَقُومَ
مِن مَّقَامِكَ ۖ وَإِنِّى عَلَيْهِ لَقَوِىٌّ أَمِينٌ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuuse yidhi kay Agtiisa ahayd Ogaanshaha Kitaabka Anaa kuu keeni Ishaada Laabideeda horteed (Ilbidhiqsi) Markuu ku Arkay Agtiisa Isa-

قَالَ ٱلَّذِى عِندَهُۥ عِلْمٌ مِّنَ ٱلْكِتَٰبِ أَنَا۠ ءَاتِيكَ بِهِۦ قَبْلَ
أَن يَرْتَدَّ إِلَيْكَ طَرْفُكَ ۚ فَلَمَّا رَءَاهُ مُسْتَقِرًّا عِندَهُۥ قَالَ

goo ku Sugan wuxuu Yidhi Kani waa Fadliga Eebahay inuu Imtixaamo inaan ku Mahdiyo iyo Inaan ka Gaaloobo, Ciddii ku Mahadisa wuxuu uun u Mahdiyey Naftiisa Ciddii Gaalowdana Eebahay waa ka Kaaftoonyahay waana Sharafbadanyahay.

هَٰذَا مِن فَضْلِ رَبِّي لِيَبْلُوَنِي ءَأَشْكُرُ أَمْ أَكْفُرُ
وَمَن شَكَرَ فَإِنَّمَا يَشْكُرُ لِنَفْسِهِۦ
وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ رَبِّي غَنِيٌّ كَرِيمٌ ﴿٤٠﴾

Wuu Diiday Nabi Sulaymaan Hadyadii, wuxuuna ugu Goodiyey inuu ku Duulo, wuxuuna ka Codsaday Colkiisa in loo Keeno Kursigeedii ka hor Imaatinkeeda Iyadoo Muslim ah, Mid Xoog badanaa Yaana Yaboohay inuu Keeno intuusan fadhiga ka Kicin, waxaase ka Dhakhso badnaaday kan ku Keeni ILbidhiqsi, Markii loo Keenay Kursigana wuxuu ku Mahadiyey Eebe'uuna Yaqiinsaday inay Imtixaan tahay Inuu ku Mahadiyo iyo Inkale, wanaTaas Akhlaaqda Dadka Wanaagsan oo ah Inay ogyhiin in Nicmadu Imtixaan tahay in la Mahadiyo iyo in kale, oyna ahayn Faan, Isla wayni iyo Durbaan Tun. Mahadda Ilaahay iyo ku Xidhnaantiisana waa Hubka Mu'miniinta.
Diidada iyo Isla Waynidana waa Caadada Gaalada. An-Naml 36-40).

---

41. Wuxuuna Yidhi Dooriya Kursigeeda inay Garato iyo Inay Noqoto Cidaan Garanayn.

قَالَ نَكِّرُوا لَهَا عَرْشَهَا نَنظُرْ أَتَهْتَدِيٓ
أَمْ تَكُونُ مِنَ ٱلَّذِينَ لَا يَهْتَدُونَ ﴿٤١﴾

42. Markay Timid waxaa lagu Yidhi ma sidanaa Kursigaagu, waxayna Tidhi waxaad Mooddaa Isagii (Wuxuuna yidhi) waxaa nala Siiyey Horteed Cilmi waxaana nahay Muslimiin.

فَلَمَّا جَآءَتْ قِيلَ أَهَٰكَذَا عَرْشُكِ قَالَتْ كَأَنَّهُۥ هُوَ وَأُوتِينَا
ٱلْعِلْمَ مِن قَبْلِهَا وَكُنَّا مُسْلِمِينَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaana (Xaqa) ka Reebay Waxay Caabudaysay oo Eebe ka soo Hadhay, waxayna ka mid ahayd Qoom Gaala ah.

وَصَدَّهَا مَا كَانَت تَّعْبُدُ مِن دُونِ ٱللَّهِ إِنَّهَا كَانَتْ
مِن قَوْمٍ كَٰفِرِينَ ﴿٤٣﴾

44. Waxaa lagu Yidhi Gal Daarta Markay Aragtayna waxay U Malaysay Mawjad (Biya ah) waxayna ka Faydatay Dhudhumadeeda, wuxuuna ku yidhi waa Daar Salaax Sugan oo Quruurado ah, waxayna Tidhi Eebow anigu waxaan Dulmiyey Naftayda, waxaana u Islaamay la Jirka Sulaymaan Ilaahay Dartiis ee Eebaha Caalamka ah.

قِيلَ لَهَا ٱدْخُلِى ٱلصَّرْحَ فَلَمَّا رَأَتْهُ حَسِبَتْهُ لُجَّةً
وَكَشَفَتْ عَن سَاقَيْهَا قَالَ إِنَّهُۥ صَرْحٌ مُّمَرَّدٌ
مِّن قَوَارِيرَ قَالَتْ رَبِّ إِنِّى ظَلَمْتُ نَفْسِى
وَأَسْلَمْتُ مَعَ سُلَيْمَٰنَ لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٤﴾

Markii loo Keenay Kursigeedii yuu Faray Nabi Sulaymaan in la Dooriyo Tilmaamihiisa Qaarkood inuu Imtixaamo inay Garato keedii inuu Yahay iyo in kale, markayse timid oo la warsaday inuu keedii yahay waxay Sheegtay in Isagii la Moodo, waxaana Xaqa U Diidanaa waxay Caabudaysay ee Ilaahay ka soo Hadhay, oy kuna Dhexnoolayd Qoom Gaalo ah, Markii la soo Dhaweeyey oy Aragtay Daar lala Yaabo iyo Xukunka Eebe Siiyey Nabi Sulaymaan yey Qirtay Islaamka ooy u Hogaansantay Ilaaha, Caalamka. Taasina waxay ku Tusin in Madaxda Muslimiinta laga Rabo inay Dadka Xaqa ugu Yeedhaan Siduu Falay Nabi Sulaymaan, oos Fali Jiray Nabigeenii-Muxamad ahaa (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) sidoo kale waxaa loo Baahan yahay in'Xaqa la Raaco si Kastoos Yahay iyo Hawl kastoos hayo, iyo wax kastoos yahay, Illeen xaqaa Horeeyey, Mudanna in La Raaco, oo la Rumeeyo. An-Naml (41-44).

45. Waxaan u Dirray Ree Thamuud Walaalkood Saalax inay Eebe Caabudaan Markaasay soo Bexeen iyagoo Labo Kooxooda oo Doodi.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَآ إِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَٰلِحًا أَنِ ٱعْبُدُوا۟
ٱللَّهَ فَإِذَا هُمْ فَرِيقَانِ يَخْتَصِمُونَ ﴿٤٥﴾

46. Wuxuuna Yidhi Qoomkayow maxaad u Dedejisanaysaan Xumaan Wanaag ka Hor, Maadse Dambi Dhaaf Warsataan Eebe inuu idiin Naxariisto.

قَالَ يَٰقَوْمِ لِمَ تَسْتَعْجِلُونَ بِٱلسَّيِّئَةِ قَبْلَ ٱلْحَسَنَةِ ۖ
لَوْلَا تَسْتَغْفِرُونَ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna Dheheen waan ku Baasaysanay Adiga iyo Inta kula Jirta, wuxuuna ku Yidhi Baaskiinnu wuxuu Jiraa Eebe Agtiisa, waxaadse Tihiin Qoom la Fidneeyey.

قَالُوا۟ ٱطَّيَّرْنَا بِكَ وَبِمَن مَّعَكَ ۚ قَالَ طَٰٓئِرُكُمْ
عِندَ ٱللَّهِ ۖ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ تُفْتَنُونَ ﴿٤٧﴾

48. Waxaana Magaalada ku Sugnaa Sagaal Qof oo Fasaadin Dhulka Hagaajinayna.

وَكَانَ فِى ٱلْمَدِينَةِ تِسْعَةُ رَهْطٍ يُفْسِدُونَ
فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxayna Dheheen isku Dhaarta Eebe inaan mirro isaga iyo Ehelkiisaba Markaas aan ku Dhahno Qaraabadiisa Maanaan Joogin Meejuu ku Halaagmay Ehelkiisu waxaana Sheegaynaa Run.

قَالُوا۟ تَقَاسَمُوا۟ بِٱللَّهِ لَنُبَيِّتَنَّهُۥ وَأَهْلَهُۥ ثُمَّ لَنَقُولَنَّ
لِوَلِيِّهِۦ مَا شَهِدْنَا مَهْلِكَ أَهْلِهِۦ
وَإِنَّا لَصَٰدِقُونَ ﴿٤٩﴾

Qisada Ree Thamuud wax Badan Buu Quraanku ka Warramay waxayse Aayadahani Sheegeen inay Qaybsameen, Sharaysteenna Nabigii iyo Intii la Jirtay, oyna Magaaladaas ku noolaayeen Sagaal Qof oo Qasayaal Dhagarta iyo Xumaanta Maleega, waxayna Isku Dhaarsadeen inay Dilaan Saalax iyo Ehelkiisa Goor Habeena uguna Dhaartaan Dadkiisa Inay Joogin Meejii Lagu Dilay. Taasina waxay ku Tusin Dhibaatada iyo Balaayada inay u Horseedaan had iyo Jeer, oyna Waajib tahay in laga Digtoonaado Xumaan wadayaasha, Maxayse ku Dambeeyeen, waa waxay Aayadaha Soo Socda inooga warrami. An-Naml (45-49).

---

50. Way Dhagreen Dhagar Anana waan Abaal marinay Iyagoon Ogayn.

وَمَكَرُوا۟ مَكْرًا وَمَكَرْنَا مَكْرًا
وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٥٠﴾

51. ee Day Siday Noqotay Cidhibtii Dhagartooda Anagaa Halaagnay Iyagii iyo Qoomkoodiiba Dhammaan.

فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ مَكْرِهِمْ
أَنَّا دَمَّرْنَٰهُمْ وَقَوْمَهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٥١﴾

52. Taasina wa Guryaahoodii oo Cidla ah Dulankoodii Dartiis, Arrintaasna Calaamad yaa ugu Sugan Qoomkii wax Ogaan.

فَتِلْكَ بُيُوتُهُمْ خَاوِيَةًۢ بِمَا ظَلَمُوٓا۟ ۗ
إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٥٢﴾

53. Waxaana Korinay kuwii Rumeeyey oo Dhawrsanayey.

وَأَنجَيْنَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟
وَكَانُوا۟ يَتَّقُونَ ﴿٥٣﴾

**Xumaan bay ka Shaqeeyeen wayna la Rogmatay oo waxaa ku Dhacay Halaag iyo Khasaare, waxaana Cidloobay Guryahoodii Dulankoodii Dartiis, waana Arrin ay ku waano iyo Wacdi Qaadato Ciddii wax kasi, waxaana la Koriyey Saalax iyo Qoomkiisii xaqa ku Taagnaa, Taasina waa Sunnada iyo Caadada Eebe inuu Halaago Daalimiinta, Koriyana Mu‘miniinta, Laga Yaabaa in Dulmigu Muddo Joogo Laakiin ma Waaro, Saas Darteed yey Waajib tahay in lagu Waano Qaato Qisooyinka Quraanka ee la soo Celceliyey wax Badan. An-Naml (50-53).**

---

54. (Nabi) Ludh (Xusuuso) markuu ku Yidhi Qoomkiisii ma waxaad la Imanaysaan Xumaan Idinkoo Arko.

وَلُوطًا إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِۦٓ
أَتَأْتُونَ ٱلْفَٰحِشَةَ وَأَنتُمْ تُبْصِرُونَ ﴿٥٤﴾

55. Idinku ma Raggaad u Tagaysaan Doonid darteed Haweenka ka sokow, waxaadse Tihiin Qoom Jaahiliina.

أَئِنَّكُمْ لَتَأْتُونَ ٱلرِّجَالَ شَهْوَةً مِّن دُونِ ٱلنِّسَآءِ ۚ
بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ تَجْهَلُونَ ﴿٥٥﴾

56. Mana Noqonin Jawaabtii Qoomkiisa waxaan ahayn ka Bixiya Luudh iyo Ehelkiisa Magaaladiinna waa Dad Isdaahirine.

۞ فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُوٓا۟
أَخْرِجُوٓا۟ ءَالَ لُوطٍ مِّن قَرْيَتِكُمْ ۖ إِنَّهُمْ
أُنَاسٌ يَتَطَهَّرُونَ ﴿٥٦﴾

57. Waana Korinay Isagii iyo Ehelkiisii Haweenaydiisii mooyee, waxaan ku Qaddarray (ka dhignay) kuwa Halaagsami.

فَأَنجَيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥٓ إِلَّا ٱمْرَأَتَهُۥ قَدَّرْنَٰهَا
مِنَ ٱلْغَٰبِرِينَ ﴿٥٧﴾

58. Waxaana ku soo Daadinay korkooda Roob (Dhagax Naara) waxaana Xumaaday Roobka kuwa Loo Digay.

وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِم مَّطَرًا ۖ فَسَآءَ مَطَرُ ٱلْمُنذَرِينَ ﴿٥٨﴾

**Qoomkii Nabi Luudh waxay ku Magaca Bixiyeen inay Ragga wax ka Dayan Jireen intay Haween Guursan lahaayeen, taasina waa Arrin Ceeb ku ah Binii Aadamka, kuna tusin Jaahilnimo iyo Fasaad intay ka Eryaan Nabi Luudh iyo Intii Rumaysay Iyagoo ku Caayi inay Nadiif Yihiin, waxaase la Yaab ah inay Nadiifi Ceeb ku Ahayd Qomkaa Agtooda kuna tahay Had iyo Jeer kuwa Xun Xun, Eebese waa Koriyey Luudh iyo Mu‘miniinta, oo Halaagay Gaaladii oo Haweeneydiisii ku Jirto, waana wax lagu Waano qaato. An-Naml (54-58).**

---

59. Waxaad Dhahdaa mahad Eebaa iska leh Nabadgalyana ha Ahaato Addoomadiis uu Doortay Korkooda, ma Eebaa Khayr roon mise waxay la Wadaajin.

قُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ وَسَلَٰمٌ عَلَىٰ عِبَادِهِ ٱلَّذِينَ ٱصْطَفَىٰٓ ۗ
ءَآللَّهُ خَيْرٌ أَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٥٩﴾

60. Ma Eebaha Abuuray Samooyinka iyo Dhulka oo idiinka soo Dejiyey

أَمَّنْ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَأَنزَلَ لَكُم

Samada Biyo oon ku soo Bixinay Beero Qurux Badan (Miyaa Khayrroon mise waxaad Caabudaysaan) ma kari kartaan inaad Soo bixisaan Geedkeeda, ma Ilaah kalaa jira Eebe Miciis, waase Qoom (xaqa) ka Leexaan.

مِّنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَنۢبَتۡنَا بِهِۦ حَدَآئِقَ ذَاتَ
بَهۡجَةٖ مَّا كَانَ لَكُمۡ أَن تُنۢبِتُواْ شَجَرَهَآۗ
أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ بَلۡ هُمۡ قَوۡمٞ يَعۡدِلُونَ ٦٠

61. Mise (waxaa Khayr roon) Eebaha ka Yeelay Dhulka Sugnaan,oo U yeelay wabiyo›buuro oo u Yeelay Badaha Dhexdooda Soohdin, ma Ilaah kalaa Jira Eebe Miciisa, Badankooduse wax ma Oga.

أَمَّن جَعَلَ ٱلۡأَرۡضَ قَرَارٗا وَجَعَلَ خِلَٰلَهَآ أَنۡهَٰرٗا
وَجَعَلَ لَهَا رَوَٰسِيَ وَجَعَلَ بَيۡنَ ٱلۡبَحۡرَيۡنِ
حَاجِزًاۗ أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ بَلۡ أَكۡثَرُهُمۡ
لَا يَعۡلَمُونَ ٦١

Wuxuu Eebe Faray Nabiga (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Yidhaahdo Mahad Eebaa iska leh, Nabadgalyona ha ahaato Addoomada Eebe Doortay korkooda, Taasoo ah inay Xumaan iyo Qas ka Nabadgalaan, Tan kale waxaa Wanaag badan Eebaha Abuuray Cirka iyo Dhulka oo Roobka keena Kuna soo Bixiya Doog iyo Beero aan Cid kale soo Bixin, karin, oo Dhulka ka Yeelay meel lagu Sugnaado, yeelayna Dhexdiisa Wabiyo iyo buuro, Badahana kala dhawra, Isagaana ah Ilaaha Xaqa, wax la mid ah ama Mudan in lala Caabudana ma jiro, wuxuuna Mudanyahay Waynayn iyo Caabudid. An-Naml (59-61).

---

62. Mise Eebaha Aqbala ka Dhibban markuu Baryo oo Fayda Xumaanta (Dhibka) idinkana Yeeli kuwa Dhulka u Hadhi (Iska Baddala), ma Ilaah kalaa Jira Eebe Miciisa,Yaraa Intaad wax Xusuusanaysaan.

أَمَّن يُجِيبُ ٱلۡمُضۡطَرَّ إِذَا دَعَاهُ وَيَكۡشِفُ ٱلسُّوٓءَ
وَيَجۡعَلُكُمۡ خُلَفَآءَ ٱلۡأَرۡضِۗ أَءِلَٰهٞ
مَّعَ ٱللَّهِۚ قَلِيلٗا مَّا تَذَكَّرُونَ ٦٢

63. Mise Eebaha idin Toosiya Mugdiyada Barriga (Dhulka) iyo Badda Dhexdeeda, oo ah kan Dira Dabaylaha oo Bishaarayn Naxariista Eebe (Roobka) hortiisa, ma Ilaah kalaa Jira Eebe Miciisa, Eebaa ka Sarreeya waxay la Wadaajin.

أَمَّن يَهۡدِيكُمۡ فِي ظُلُمَٰتِ ٱلۡبَرِّ وَٱلۡبَحۡرِ
وَمَن يُرۡسِلُ ٱلرِّيَٰحَ بُشۡرَۢا بَيۡنَ يَدَيۡ رَحۡمَتِهِۦٓۗ
أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ تَعَٰلَى ٱللَّهُ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ٦٣

64. Mise Eebaha Billaaba Khalqiga (Abuurkiisa) Haddana soo Celin, oo ah kan Idinka Arzaaqa Samada iyo Dhulkaba, ma Ilaah (kalaa) Jira Eebe Miciisa, waxaad Dhahdaa Keena Xujadiinna Haddaad Run Sheegaysaan.

أَمَّن يَبۡدَؤُاْ ٱلۡخَلۡقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ وَمَن يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ
وَٱلۡأَرۡضِۗ أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ قُلۡ هَاتُواْ بُرۡهَٰنَكُمۡ
إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ٦٤

Ilaahaybaa Ajiiba kan Dhibban Dadkana kala Badala in la Xusana Mudan, Sidoo kale Isagaa Toosiya Mugdiyada Mudanna inaan Cid kale lala Caabudin, Billaabana Abuuridda'Soona Celiya Dadka, Arzaaqana Dadka.

Nabigana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Markii la Warsaday Maxaad u Yeedhi, waxaan u Yeedhi Eebaha Hadduu ku Taabto Dhib ood barido kaa Fayda, kan Baadida kuu soo Celiya, kan Abaartu markay ku Hesho kaa Bixiya. waxaa wariyey (Imaam Axmed).

Saasay Xaq u tahay in lagu Dhaqmo Sharcigiisa, loona Hogaansamo. An-Naml (62-64).

65. Waxaad Dhahdaa ma Oga waxa Samooyinka iyo Dhulka ku Sugan waxa Maqan Eebe mooyee, mana Oga Goorta la Soo Bixin.

قُل لَّا يَعْلَمُ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ٱلْغَيْبَ إِلَّا ٱللَّهُ ۚ
وَمَا يَشْعُرُونَ أَيَّانَ يُبْعَثُونَ ﴿٦٥﴾

66. Wuxuuse Gaadhay Cilmigoodu Aakhiro (Buuxsami) waxayse kaga Suganyihiin Xageeda Shaki, wayna ka Indho La‘yihiin Xaggeeda.

بَلِ ٱدَّٰرَكَ عِلْمُهُمْ فِي ٱلْءَاخِرَةِ ۚ بَلْ هُمْ
فِي شَكٍّ مِّنْهَا ۖ بَلْ هُم مِّنْهَا عَمُونَ ﴿٦٦﴾

67. Waxay Dheheen kuwii Gaaloobay Markaan Noqonno Carro Anaga iyo Aabayaalkanno miyaa nala soo Bixin.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ أَءِذَا كُنَّا تُرَٰبًا وَءَابَآؤُنَآ
أَئِنَّا لَمُخْرَجُونَ ﴿٦٧﴾

68. Waa Naloo Yaboohay Kan (soo Bixinta) Anaga iyo Aabayaalkanno mar hore, kanna ma aha waxaan Warkii Dadkii hore ahayn.

لَقَدْ وُعِدْنَا هَٰذَا نَحْنُ وَءَابَآؤُنَا مِن قَبْلُ إِنْ هَٰذَآ
إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٦٨﴾

69. Waxaad Dhahdaa ku Socda Dhulka oo Daya siday Noqotay Cidhibtii Dambiilayaasha.

قُلْ سِيرُوا۟ فِي ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ
عَٰقِبَةُ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٦٩﴾

70. Hana u Murgin Korkooda, hana ka Cidhiidhyamin waxay Dhagri.

وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ وَلَا تَكُن
فِي ضَيْقٍ مِّمَّا يَمْكُرُونَ ﴿٧٠﴾

Wax Maqan Cid og oon Eebe ahayn ma Jiro, mar Dadka la soo Bixin Cid og oon Ilaahay ahayna ma Jiro, Maxayse Tari wax Ogaan marka Aakhiro la tago, Addunkay ku Wanaagsantahay inaad Xaqa Ogaatid, oodan ka Indho La‘aan, Diididda soo Bixinta, Xaqiridda Xaqa iyo Cidda u Yeedhina waa Caadada Gaalada Xaq diidayaasha ah, Hase Socdeen Dhulka oo ha ku Waano Qaateen siday Noqotay Cidhibtii Dambiilayaasha.
Waxaana Eebe Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee) Inuusan ka Murugoonin Cidhiidhina is Galinin, Taasina waxay Waano Guud u Tahay iyo wax ku Qaadasho kuwa Xaqa u Yeedhe Goor kasta. An-Naml (65-70).

---

71. Waxayna Odhan waa Goorma Yaboohaasi Haddaad Run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٧١﴾

72. Waxaad Dhahdaa waxaa Suurowda inay Dhawdahay waxaad Dedejisanaysaan Qaarkeed.

قُلْ عَسَىٰٓ أَن يَكُونَ رَدِفَ لَكُم بَعْضُ ٱلَّذِى
تَسْتَعْجِلُونَ ﴿٧٢﴾

73. Eebahaana waa Fadli Siiyaha Dadka, Laakiin Badankoodu kuma Mahdiyaan.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ
لَا يَشْكُرُونَ ﴿٧٣﴾

74. Eebahaana wuxuu Ogyahay Waxay Qarin Laabahoodu iyo waxay Muujin.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَيَعْلَمُ مَا تُكِنُّ صُدُورُهُمْ وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٧٤﴾

75. Waxa ku Maqan Samada iyo Dhulkana waxay ku Suganyihiin Kitaab Cad.

وَمَا مِنْ غَآئِبَةٍ فِي ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ
إِلَّا فِي كِتَٰبٍ مُّبِينٍ ﴿٧٥﴾

76. Quraankanna wuxuu ka Qisoon (Warrami) Banii Israa‘iil wixii Badnaa ay isku Khilaafeen.

إِنَّ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ يَقُصُّ عَلَىٰ بَنِيٓ إِسْرَٰٓءِيلَ
أَكْثَرَ ٱلَّذِي هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٧٦﴾

77. Quraankuna waa Hanuun iyo Naxariista Mu‘miniinta.

وَإِنَّهُۥ لَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٧٧﴾

78. Eebahaana wuxuu ku kala Xukumi Dhexdooda Xukunkiisa waa Adkaade Og.

إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِي بَيْنَهُم بِحُكْمِهِۦ
وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٧٨﴾

**Gaaladu Had iyo Jeer waxay Dedejistaan Ciqaabta iyo Qiyaamada, wax kastase waxay leeyihiin Waqti iyo Muddo, Eebana waa u Nicmeeyaha Dadka Laakiin Badankoodu Kuma Mahdiyaan, waana Ogaha waxa Laabta ku Jira iyo waxa la muujinba, Cirka iyo Dhulka waxa ku maqanna waxay ku Suganyihiin Kitaab Cad oo Koobay. Quraankuna wax Badan yuu ka Warramay siday Isu Khilaafeen Banii Israa‘iil, waana Hanuunka iyo Naxariista Mu‘miniinta, Eebaana kala Xukumi Dadka Xukun Caadil ah, isagoon wax la awood ahna jirin, wax kastana og. oyna waajib tahay in loo Noqdo, loo Hogaansamo, Dhabna loo Caabudo. An-Naml (71-78).**

---

79. ee Talo Saaro Eebe Adugu waxaad ku Sugantahay Xaq Cade.

فَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ إِنَّكَ عَلَى ٱلْحَقِّ ٱلْمُبِينِ ﴿٧٩﴾

80. Adugu wax ma Maqashiisid kuwa Dhintay mana Maqashiisid Dhagoolaha Dhawaaq markay Jeedsadaan iyagoo sii Socda.

إِنَّكَ لَا تُسْمِعُ ٱلْمَوْتَىٰ وَلَا تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ ٱلدُّعَآءَ
إِذَا وَلَّوْا۟ مُدْبِرِينَ ﴿٨٠﴾

81. Mana Tihid mid ka Toosin kara Indhoolaha Baadidiisa, waxna ma maqashiin kartid Ruux Rumeeyey Aayaadkanaga oo Muslima mooyee.

وَمَآ أَنتَ بِهَٰدِي ٱلْعُمْيِ عَن ضَلَٰلَتِهِمْ إِن تُسْمِعُ
إِلَّا مَن يُؤْمِنُ بِـَٔايَٰتِنَا فَهُم مُّسْلِمُونَ ﴿٨١﴾

82. Markuu ku Dhaco Korkooda Qawlkii (Ciqaabtii) waxaan u soo Bixinnaa Daabbaddii Dhulka oo la Hadli Dadkuna waxay ahaayeen kuwaan Yaqiinsanayn Aayaadkanaga.

۞ وَإِذَا وَقَعَ ٱلْقَوْلُ عَلَيْهِمْ أَخْرَجْنَا لَهُمْ دَآبَّةً
مِّنَ ٱلْأَرْضِ تُكَلِّمُهُمْ أَنَّ ٱلنَّاسَ كَانُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا
لَا يُوقِنُونَ ﴿٨٢﴾

83. Xusuuso Maalintaan ka soo Kulminayno Ummad kasta Koox ka mid ah kuwii Beeniyey Aayadkanaga iyagoo is Cidhiidhyi.

وَيَوْمَ نَحْشُرُ مِن كُلِّ أُمَّةٍ فَوْجًا مِّمَّن يُكَذِّبُ
بِـَٔايَٰتِنَا فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿٨٣﴾

84. Markay Yimaaddaanna wuxuu ku Dhahaa Miyaad Beeniseen Aayaadkaygii idinkoon koobin Ogaansho, Maxaadse Fali Jirteen.

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءُو قَالَ أَكَذَّبْتُم بِـَٔايَٰتِي
وَلَمْ تُحِيطُوا۟ بِهَا عِلْمًا أَمَّاذَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨٤﴾

85. Waxaa ku Dhacay Qawlkii (Ciqaabtii) Dulmigooda Dartiis mana Hadlayaan.

وَوَقَعَ ٱلۡقَوۡلُ عَلَيۡهِم بِمَا ظَلَمُواْ فَهُمۡ لَا يَنطِقُونَ ٨٥

86. Miyeyna Arkayn inaan uga Yeellay Habeenka inay ku Xasilaan, Maalintana Arag, Arrintaasna Calaamooyin yaa ugu Sugan Ciddi Rumayn (Xaqa).

أَلَمۡ يَرَوۡاْ أَنَّا جَعَلۡنَا ٱلَّيۡلَ لِيَسۡكُنُواْ فِيهِ وَٱلنَّهَارَ
مُبۡصِرًاۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٨٦

**Waana Inay Ilaahay Talo Saarato Cidda Xaqa ku Toosan oo ah inay waxa la Faray Falaan, ka Dibna Eebe ku Kalsoonaadaan, cid Xaqa ka Dhaga la‘na oo ka Indho la‘na Ruux Hanuunin kara oo Ilaahay ahayn Ma jiro.**
**Markay Qiyaamadu Imaanna waxaa soo Bixi Daabad la Hadli Dadka, waxaa loo soo kulmin Ummad kasta Kooxihii Beenin Jiray Xaqa, laguna Canaanan inay xaqa beeniyeen Iyagoon Koobin Cilmigiisa, waxaana ku Dhici Ciqaab Dulmigooda Dartiis. Habeenka iyo Maalintana Waano ugu Filan Ciddii Rumeyn. Qiyaamadana waxaa ka Horeeya Toban Calaamo Sida Sugan. An-Naml (79-86).**

---

87. Xusuuso Maalinta la Afuufi Suurka oos Argagixi waxa ku Sugan Samooyinka iyo Dhulka Cidduu Eebe Doono Mooyee, Dhammaanna way u Imaan Eebe Iyagoo Dullaysan.

وَيَوۡمَ يُنفَخُ فِي ٱلصُّورِ فَفَزِعَ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَمَن فِي ٱلۡأَرۡضِ إِلَّا مَن شَآءَ ٱللَّهُۚ وَكُلٌّ أَتَوۡهُ
دَٰخِرِينَ ٨٧

88. Waxaadna Arkaysaa Buurihii ood u Malayn inay ingagantahay (Sugantahay) iyadoo u Socota sida Daruuraha, waase Sancada Eebaha Sugay wax kasta, Eebana waa Ogaha waxaad Falaysaaan.

وَتَرَى ٱلۡجِبَالَ تَحۡسَبُهَا جَامِدَةٗ وَهِيَ تَمُرُّ مَرَّ ٱلسَّحَابِۚ
صُنۡعَ ٱللَّهِ ٱلَّذِيٓ أَتۡقَنَ كُلَّ شَيۡءٍۚ
إِنَّهُۥ خَبِيرُۢ بِمَا تَفۡعَلُونَ ٨٨

89. Ciddii la Timaadda Wanaag wuxuu Mudan wax ka Khayr roon Argagaxa Maalintaasna Iyagu way Aamin Noqon.

مَن جَآءَ بِٱلۡحَسَنَةِ فَلَهُۥ خَيۡرٞ مِّنۡهَا وَهُم مِّن فَزَعٖ
يَوۡمَئِذٍ ءَامِنُونَ ٨٩

90. Ciddiise la Timaadda Xumaan waxaa Loogu Tuuri Wajiga Naarta, miyaa Laydinka Abaal Mariyaa waxaad Falayseen Mooyee.

وَمَن جَآءَ بِٱلسَّيِّئَةِ فَكُبَّتۡ وُجُوهُهُمۡ فِي ٱلنَّارِ
هَلۡ تُجۡزَوۡنَ إِلَّا مَا كُنتُمۡ تَعۡمَلُونَ ٩٠

**Eebe wuxuu ka Warrami in Suurka la Afuufi oos Dhiman Ruux kasta waxa Eebe Reebo mooyee, Doorsoon Badanna Dhici, Sida Buuraha, Dhulka, iyo Dadkuba, Ilaaheense waa kan Sugay Abuurka wax kasta, wax Walbana Og, Wanaaggana Wanaag ku Abaal mariya iyo wax ka sii fiican, Xumaantana Naar ku Abaal mariya isagoon Dulmiyeyn, Qiyaamaduna waa Maalin wayn oo Quraanku wax Badan ka Digay, oyna Habboontahay in loo Darbado, loona Shaqaysto, kaasoo ah Wanaag falid, Xumaan ka Fogaansho iyo Xaq Raacid, waana Maalinta Carruurta Cirroole ka Yeeli, Cidna kale wax u Tarayn, in Eebe Doono Mooyee. An-Naml (87-90).**

91. Waxaa uun Lay Faray inaan Caabudo Eebaha Baladkan (Maka) ee ah kan Xarrimay oo wax kastana iska leh, waxaana lay Faray inaan ahaado Muslimiinta.

إِنَّمَآ أُمِرۡتُ أَنۡ أَعۡبُدَ رَبَّ هَٰذِهِ ٱلۡبَلۡدَةِ ٱلَّذِي
حَرَّمَهَا وَلَهُۥ كُلُّ شَيۡءٖۖ وَأُمِرۡتُ
أَنۡ أَكُونَ مِنَ ٱلۡمُسۡلِمِينَ ٩١

92. iyo Inaan Akhriyo Quraanka Ruuxiise Hanuuna wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa, Ruuxiise Dhuma waxaad dhahdaa Anugu waxaan uun ahay kuwa Diga.

وَأَنۡ أَتۡلُوَاْ ٱلۡقُرۡءَانَۖ فَمَنِ ٱهۡتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهۡتَدِي
لِنَفۡسِهِۦۖ وَمَن ضَلَّ فَقُلۡ إِنَّمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلۡمُنذِرِينَ ٩٢

93. Waxaadna dhahdaa Mahad Eebaa iska leh wuxuu idin tusin Aayaadkiisa oo Aqoonsanaysaan, mana aha Eebaha mid Halmaansan waxaad Falaysaan.

وَقُلِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ سَيُرِيكُمۡ ءَايَٰتِهِۦ فَتَعۡرِفُونَهَاۚ وَمَا رَبُّكَ
بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعۡمَلُونَ ٩٣

Eebe wuxuu Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Caabudo Ilaaha Magaalada Barakaysan ee Maka, ee Xurmeeyey, iyo inuu u Hogaansamo, Quraankana Akhriyo, Illeen Ciddii Hanuunta wuxuu uun wax u Taray Naftiisa, tii Dhuntana waxay uun Dhibtay Nafteeda.
Nabigana Waxaa uun Saaran u Digid iyo Gaadhsiin Xaqa, Mahadna Eebaa iska leh, Dadkana Tusin doona Aayaadkiisa si ay Xujadu u Qabato, wax uu ka Halmaansanyahay waxay Falina ma jirto, Magaalo walba Eebaa iska leh ee waxaa Maka loo Sheegay Sharafteeda. Waxaana Sugnaatay in la Reebay Goynta Geedaheeda, Dilidda Ugaadheeda, iyo Qaadidda Baadideeda, Cidaan Yaahdinayn. Si kastood tahayna Eebe waa ku Ogyahay.
Cumar Binu CabdiCasiis wuxuu Yidhi: Eebe ma Halmaamo xataa Boodhka Dabayshu ku Kiciso Gomadaha Dadka. An-Naml (91-93).

## Suurat Al-Qaṣaṣ سورة القصص

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku Tusin Mucjisada Quraanka.

طسٓمٓ ١

2. Taasina waa Aayaadka Kitaabka (Quraanka) ee Cad.

تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡكِتَٰبِ ٱلۡمُبِينِ ٢

3. Waxaannu kugu Akhrin Korkaaga Warkii (Nabi) Muuse iyo Fircoon si Xaq ah Qoomkii Rumayn.

نَتۡلُواْ عَلَيۡكَ مِن نَّبَإِ مُوسَىٰ وَفِرۡعَوۡنَ
بِٱلۡحَقِّ لِقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٣